INDEPENDENT SCHOOL DISTRICT 196
Rosemount-Apple Valley-Eagan Public Schools
Waxbarida, Kobcinta, iyo dhiirigelinta ardaydeena si ay uga gaaraan nolosha guul waarta.

Lambarka Taxanaha **503.1AR** La-aqabalay **Diisambar 1977** Dib wax looga badalay **Janaayo 2025**

Cinwaanka **Raadinta iyo Wareysiyada**

1. **Baaritaanka iyo La Wareegidda Hantida ama Xogta**

1.1 Haddii maamulka dugsigu haysto sabab ay ku aaminaan in fal sharci darro ah ama ku xadgudub sharciga dugsiga ah in la galay ama ay ku dhowdahay in lagu kaco, waxay awood u leeyihiin inay baaraan ardayga iyo iyada ama hantidiisa gaarka ah, oo ay ku jiraan taleefannada gacanta iyo gaadiidka, ama iskuul kasta hantida degmada ee uu isticmaalay ardaygu, ayna la wareegaan shay kasta oo lahaanshihiisa kaas oo si gaar ah looga mamnuucayo sharciga, xeerarka degmada ama xeerarka dugsiga ama ay ku jiraan caddaynta ku tumashada sharciga, xeerarka degmada ama xeerarka dugsiga. Raadinta waxay ku koobnaan doontaa duruufaha ay jiraan shaki macquul ah oo ku saabsan in baaritaanka uu soo saari doono caddeyn ku saabsan dhaqan xumo looga shakisan yahay. Baaxadda iyo / ama dhexgalka baaritaanka waa inay si macquul ah ula xiriiraan ujeedooyinka baaritaanka.

1.2 Markasta oo ay suurta gal tahay, ardaygu wuu joogi doonaa marka iyada ama isaga hantidiisa ama hantida iskuul ay isaga ama iyadu isticmaasho la baarayo.

1.3 Baadhitaan guud oo ku saabsan guryaha, aaladaha iyo teknoolojiyada dugsiga oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn sanduuqyada, Ipads-yada, kombiyuutarada, shabakadaha kombiyuutarka, aaladaha dijitaalka ah ee dugsiga ama miisaska, ayaa dhici kara wakhti kasta, walxaha dugsigana waa la qabsan karaa. (Fiiri Qeybta 2, hoosta, si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada dugsiga.)

1.4 Dugsiyadu waxay isticmaali karaa ey si gaara loo tabobaray si ay u dareemaan uguna wargaliyaan masuuliyiinta jiritaanka waxyaabaha la mabnuucay iyo walxaha sharci-darrada ah ee ku jira sanduuqyada, goobaha guud iyo/ama meelaha baarkinka dugsiga. Haddii eey u digto shay ku jira sanduuqa ama gaari waxaa laga yaabaa inay baaraan saraakiisha iskuulka.

1.5 Dhammaan waxyaabaha la soo qabtay waxaa la siin doonaa hay'adaha ku habboon ama dib ayaa loogu celin doonaa milkiilaha dhabta ah.

1.6 Maamulka dugsigu qaab elektaroonig ah ulama socon doono ama uma adeegsan doono aalada dugsigu siiyey ardeyga marka laga reebo inta uu ogol yahay Qaanuunka Minnesota ee 13.32 faqrada. 14.

1.7 Qeybaha 1.1-1.5 ee kor ku xusan waxay la xiriiraan baaritaanada ay samaynayaan saraakiisha dugsiga. Marka laga reebo sida si kale uu u oggolaado xeerkan, maamulka dugsiga waa in uu la xiriiraa waaxda sharciga ee degmada si uu uga raadsado hagis sharci haddii ay dhacdo in sharci fulinta ay dugsi siiso waaran lagu baarayo, amar maxkamadeed ama amar yeeris maxkamadeed oo la doonayo in lagu helo xog ama hanti ama haddii kale la rabo in lagu baaro dugsi. Ujeedooyinka xeerkan awgood, sharci fulinta waxaa ka mid ah hay'adaha sharci fulinta ee federaalka, gobolka iyo kuwa maxalliga, oo ay ku jiraan hay'adaha fulinta socdaalka.

2. **Sandquuyada Dugsiga**

2.1 Sanduuqyada dugsigu waa hantida degmada. Marna degmadu kama tanaasusho kantaroolkeeda khaaska ah ee loogu talagalay ku habboonaanta ardayda.

2.1.1 Baadhitaanka gudaha ee sanduuqyada waxaa fulin kara maamulka iskuulka sabab kasta ha noqotee waqti kasta, ogeysiis la'aan, ogolaansho la'aan ardayga iyo amar la'aan baaris.

2.1.2 Hantida gaarka ah ee ardeyda ku dhex jirta khaanadaha iskuulka waa la baari karaa oo keliya marka maamulka iskuulka ay leeyihiin shaki macquul ah oo ah in baaritaanka uu

soo bandhigi doono cadeynta xadgudubka sharciga ama sharciyada iskuulka.

2.2 Sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah kadib baadhitaanka waxyaabaha ardayga u gaarka ah, maamulayaasha dugsigu waa inay siiyaan ogeysiiska baaritaanka ardayda la baadhay santuuqayadooda haddii aan shaaca laga qaadin wax u dhimeynin baaritaanka socda ee booliska ama saraakiisha dugsiga.

2.3 Nuxurka sharcigan khuseeya sandquuyada dugsiga waxa lagu daabici doonaa Guudmarka Xuquuqda iyo Masuuliyadaha Ardeyga ee sanadlaha.

3. **Baadhitaanka eyda** – Si loo ilaaliyo jawi amaan ah oo caafimaad leh, nidaamka qorshaynta iyo guud ahaan baaritaanka eyga ee iskuulka oo idil (badanaa loogu yeero urta eyga) ee ardayada ardayda, miisaska, gawaarida marka la dhigaayo dhismaha iskuulka, iyo xarumaha iyo sagxadaha iskuulka waxaa laga yaabaa in lagu qabto waqtiyo degmo 196. Intaas waxaa sii dheer, ogaanshaha canine-ka sidoo kale waa la isticmaali karaa marka maamule uu qabo shaki gaar ah oo ah in waxyaabaha sharci darada ah lagu haysto hantida iskuulka. Waxyaabaha koontarabaaniga ah ee laga yaabo inay soo ogaato canine-ka waxaa ka mid ah daroogada, aaladaha bambooyinka iyo qoryaha fudud. Ogeysiiska baadhitaanka eyda waxa loo bixin doonaa si sanadle ah kahor bilowga sanad dugsiyeedka.

3.1 Goobaha Lagu Sameynayo Baadhitaanka Eyda

3.1.1 Sanduuqyada ardeyda iyo miisaska;

3.1.2 Sanduuqyada waxbarashada caadiga ee ardeyga;

3.1.3 Meelaha baarkinada oo ay ku jiraan dibada gawaarida lagu baarkin gareeyey dugsiga;

3.1.4 Basaska dugsiga;

3.1.5 Hoolasha/goobaha guud ee dugsiga;

3.1.6 Suuliyada;

3.1.7 Biibito;

3.1.8 Xuduuda dugsiga;

3.1.9 Dhulka dugsiga, marka loo baahdo lana fiiriyo shaki macquula, iyo/ama

3.1.10 xarumaha iyo dhulka kale ee dugsiga ee aan lagu xusin sare.

3.2 Nidaamyada Inta Lagu Jiro Baadhista Eyda

3.2.1 Macalimiinta waxa la weydiin doonaa inay xidhaan albaabadooda oo ay iskasii wataan xiisadahooda inta lagu jiro noockasta oo nidaam baadhis ey ah.

3.2.2 Macalimiinta waxa la fari doonaa in aanay u ogolaan ardeyda dibada fasalka inta baadhista eyda laga wado gudaha dhismaha la doortay ee dugsiga.

3.2.3 Baadhista eydu waxay dhici kartaa inta lagu jiro dugsiga iyo/ama fiidkii.

3.3 Kooxda Baarista

3.3.1 Maamulka dugsiga ama nashqadeeyaha ayaa sameyn doona baadhista eyga isagoo caawimo ka helaya qof u tababaran, kasoo noqon kara sargaal booliis.

3.3.2 Dadaalada macquulka ah ayaa la sameyn doonaa si looga horago xawayaanka baadhista eyga inuu u dhawaado ardey ama shaqaale inta lagu jiro nidaamka baadhista.

3.3.3 Haddii eydu “sheegto” jiritaanka kontorobaan waxa jiri kara shaki macquula kaasoo keenaya in baaris lagu fuliyo goobta, oo ay ku jiraan waxyaabaha gaarka ay ardeydu uleedahay ee yaal meesha la sheegay. Haddii kontorobaan la helo, arinta waxa loo gudbin karaa sharci fulinta iyadoo cadeyn danbi ah. Sharciga fulinta ayaa ka masuul

qaadista tallaabada booliis ee kuhaboon sida uu jideeyey sargaalku.

3.3.4 Isla marka baadhista alaabaha gaarka ee ardeyda kadib, maamulaha dugsiga ayaa siin doona ogeysiiska baadhista ardeyda alaabtooda gaarka ah la baadhay ilaa baadhistu ay carqaladaynayso baadhista booliiska ama maamulka dugsiga mooyee.

Maamulka dugsiga ayaa sameyn doona baadhista alaabaha gaarka ee ardeyda iyadoo la ilaalinaayo asturnaanta ardeyda marka la baadhayo.

4. **Wareysiyada ardayga ee ay la leeyihiin Saraakiisha Adeegga Bulshada iyo Fulinta Sharciga iyo Xiritaanada**

4.1 Ujeedada

Waxaa jira marar dad aan ahayn masuuliyiinta degmada dugsiga iyo shaqaalaha ay u arkaan in ay lagama maarmaan tahay in ay la hadlaan arday inta lagu jiro maalinta dugsiga. Badbaadada ardayga iyo carqaladaynta barnaamijka waxbarashada ayaa walaac ku ah degmada dugsiga. Ujeedada xeerkan waxa ay tahay in la dejiyo habraacyada ay ardayda marin ugu helayaan shakhsiyaad aan la idmin inta lagu jiro maalinta dugsiga.

4.2 Mabaadii'da Hagaysa

4.2.1 Guud ahaan, inta lagu jiro maalinta dugsiga ardayda ma waraysan karaan shakhsiyaad aan ka ahayn waalidiinta ardayga ama kuwa mas'uulka ka ah, masuuliyiinta degmada dugsiga, shaqaalaha iyo/ama wakiilada, marka laga reebo sida uu si kale u oggolaado sharciga iyo/ama xeerkan.

4.2.2 Codsiyada lagu waraysanayo ardayda ee ay codsadaan saraakiisha sharci fulinta iyo kuwa aan ka ahayn waalidiinta ardayga ama kuwa mas'uulka ka ah, masuuliyiinta degmada dugsiga, shaqaalaha iyo/ama wakiilada, waa in la soo mariyaa xafiiska maamulaha. Marka uu helo codsi, waa mid masuuliyad ay ka saaran tahay maamulaha inuu codsiga aqbalo iyo in kale lana tashado waaxda sharciga ee degmada marka ay habboon tahay. Kahor inta uusan codsiga aqbalin, maamuluhu waa inuu guud ahaan isku dayaa waalidiinta ardayga ama kuwa mas'uulka ka ah si uu ugu wargeliyo codsiga, marka laga reebo meeshi uu si kale u mamnuucayo sharciga ama meeshi qeybaha kale ee xeerkan uu bixinayo in ogaysiis hore oo la ogaysiiyo waalidiinta ama kuwa mas'uulka ka ah ardayga aan loo baahnayn.

4.3 Waraysiyada Lagu Qaado Xeerka Si Xun Ula Dhaqanka Carruurta Yaryar

4.3.1 Kiiska baaritaan iyada oo la raacayo Xeerka Sheegista Si Xun Ula Dhaqanka Carruurta Yaryar, Xeerarka Minnesota Cutubka 260E, hay'ad xannaano oo maxalli ah, hay'adda mas'uulka ka ah baarista warbixinta, iyo hay'ad sharci fulin oo maxalli ah, ayaa waraysan kara, iyadoon la haysan oggolaansho waalid, iyagoo waraysanaya dhibbanaha la sheegay iyo carruur kasta oo hadda la degan ama la deganaa dembiilaha eedaysan. Waraysiga ayaa lagu qaadi karaa dugsiga iyo saacadaha lagu jiro dugsiga. Masuuliyiinta degmada dugsiga waxay la shaqayn doonaan hay'adda xannaanada maxalliga, hay'adda mas'uulka ka ah baarista warbixinta, ama hay'adda sharci fulinta maxalliga ah si ay u doortaan goobta ku habboon waraysiga.

4.3.2 Marka hay'adda xannaanada maxalliga, hay'adda sharci fulinta maxalliga ah, hay'adda mas'uulka ka ah qiimeynta ama baarista warbixinta si xun ula dhaqanka ay go'aamiyaan in waraysiga lagu qaado goob degmada dugsiga ah, masuuliyiinta degmada dugsiga waa in ay helaan ogaysiis qoraal ah oo ku saabsan ujeedada canugga loogu waraysanayo goob degmada dugsiga ah kahor waraysiga. Ogeysiiska waxaa ku jiri doona magaca canugga la wareysanayo, ujeeddada wareysiga iyo tixraaca hay'adda qaanuuniga si ay wareysi uga qaado dhismaha degmada dugsiga. Marka waraysiyada ay qaadayso hay'adda xannaanada maxalliga, ogaysiisku waa inuu saxiixaa guddoomiyaha hay'adda adeegyada bulshada ee maxalliga ama wakiilka guddoomiyaha. Ogaysiisku waa xog waxbarasho oo gaar ah oo ku saabsan ardayga. Mas'uuliyiinta degmada dugsiga uma sheegi karaan waalidka, mas'uulka sharciga ah ama qofka

mas’uulka ka ah canugga waxyaabaha ku qoran ogaysiiska ama wixii macluumaad kale ah ee la xiriira waraysiga ilaa ay ogaysiis qoraal ah ay ka helaan hay’adda qaabilsan daryeelka maxalliga ah ama hay’adda fulinta sharciga oo sheegaya in baaritaanka ama qiimeynta la soo gabagabeeyey, marka laga reebo in shaqaale dugsi ama wakiil lagu eedeeyo inuu si xun ula dhaqmay canugga. Ilaa masuuliyiinta degmada dugsiga ay ka helaan ogaysiiska la sheegay, dhammaan su’aalaha ku aadan nooca baaritaanka ama qiimeynta waa in lagu hagaajiyaa hay’adda xannaanada maxalliga ama hay’adda sharci fulinta ama hay’adda mas’uulka ka ah qiimeynta ama baarista warbixinta si xun ula dhaqanka waa in ay keligood masuul ka noqdaan shaacin kasta oo ku aadan nooca qiimeynta ama baaritaanka.

4.3.3 Mas'uuliyiinta degmada dugsiga waxay go’aan u lahaan doonaan inay si macquul ah u muddeeyaan waqtiga, goobta, iyo qaabka hay’ad xannaano maxalli ah ama hay’ad sharci fulin ay waraysi ugu qaadayaan dhismayaasha degmada dugsiga. Si kastaba ha noqotee, marka dembiilaha eedaysan la rumaysan yahay inuu yahay masuul ka tirsan degmada dugsiga, ama shaqaale ka yahay, hay’adda xannaanada maxalliga ama hay’adda sharci fulinta waxay go’aan u lahaan doonaan inay go’aamiyaan halka waraysiga lagu qaban doono. Waraysiga waa in lagu qaadaa muddo aan ka badnayn 24 saac kadib marka la helo ogaysiiska haddii aanay waqti kale ku heshiin masuuliyiinta degmada dugsiga iyo hay’adda xannaanada maxalliga ama hay’adda sharci fulinta. Si kastaba ha noqotee, masuuliyiinta degmada dugsiga waa inay oggolaadaan ikhtiyaarka go’aanka hay’adda xannaanada maxalliga ama hay’adda sharci fulinta ee ku aadan shakhsiyaadka kale ee goob joogga u ah waraysiga. Mas'uuliyiinta degmada dugsiga waxay samayn doonaan dadaal kasta si ay u yareeyaan carqaladaynta barnaamijka waxbarasho ee canugga, ardayda kale, ama shaqaalaha dugsiga marka waraysi lagu qabanayo dhismayaasha degmada dugsiga.

4.3.4 Ardayda waa in aan laga wadin dhismaha degmada dugsiga iyadoon la haysan oggolaanshaha maamulaha iyo dukumiintiyayn habboon.

4.4 Waraysiyada Sharci Fulinta iyo Xiritaanada

4.4.1 Qeybta 4.4 waxay khusaysaa waraysiyada sharci fulinta iyo xiritaanada laga sameeyo dugsiga ee aan loo samayn iyadoo lala xiriirinayo baaritaan ku saabsan si xun ula dhaqan la sheegay sida lagu qeexay qeybta 4.3 ee sare.

4.4.2 Waraysiyada Ku Aadan Habdhaqan La Xiriira Dugsiga - Maamulka dugsigu waxay oggolaansho siin doonaan masuuliyiinta sharci fulinta si ay arday ugu waraystaan dugsiga taasoo ku saabsan dhaqan-xumo la sheegay, ama dhaqan-xumo la sheegay oo ku saabsan kuwo kale, oo ka dhacday barxadaha dugsiga, iyo/ama inti lagu jiray maalinta dugsiga, ama la xiriirta badbaadada dugsiga kaliya marka:

4.4.2.1 waraysiga lagu qabto qol xiran oo ka fog aragtida ardayda iyo dadka waaweyn;

4.4.2.2 Maamule dugsi ama sarkaal sharci fulin uu isku dayo inuu ku wargaliyo waalidka ardayga ama qofka mas'uulka ka ah wax ku saabsan wareysiga isla maalinta ay dhacdo; iyo

4.4.2.3 maamulka dugsiga uu weydiisto inuu arko aqoonsiyada sarkaalka sharci fulinta oo uu diiwaangeliyo aqoonsiyada kahor inta uusan u fasixin ardayga haddii sarkaalka aanan laga garanaynin dugsiga.

Meelaha laga soo reebayo qeybtan ayaa la oggolaan karaa iyadoo looga jawaabayo duruufaha qasbaya ama amar maxkamadeed oo si habboon loo soo saaray, waaran ama yeeris maxkamadeed. Maamulayaasha dugsiyada waa in ay isku dayaan in ay la xiriiraan waaxda sharciga si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan amar kasta oo garsoor, waaran kasta ama yeeris kasta oo maxkamadeed.

4.4.3 Waraysiyada Ku Aadan Habdhaqan Aan La Xiriirin Dugsiga - Maamulka dugsigu waxay

oggolaansho siin doonaan masuuliyiinta sharci fulinta si ay arday ugu waraystaan dugsiga taasoo ku saabsan dhaqan-xumadooda la sheegay, ama dhaqan-xumo la sheegay oo ku saabsan kuwo kale, oo dhacay waqti ka baxsan maalinta dugsiga kana baxsan dhismaha dugsiga kaliya marka:

4.4.3.1 waraysiga lagu qabto qol xiran oo ka fog aragtida ardayda iyo dadka waaweyn;

4.4.3.2 sarkaalka sharci fulinta uu oggolaansho hore ka helo waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga si uu uga qaado waraysiga; iyo

4.4.3.3 maamulka dugsiga uu weydiisto inuu arko aqoonsiyada sarkaalka sharci fulinta oo uu diiwaangeliyo aqoonsiyada kahor inta uusan u fasixin ardayga haddii sarkaalka aanan laga garanaynin dugsiga.

Meelaha laga soo reebayo qeybtan ayaa la oggolaan karaa iyadoo looga jawaabayo duruufaha qasbaya ama amar maxkamadeed oo si habboon loo soo saaray, waaran ama yeeris maxkamadeed. Maamulayaasha dugsiyada waa in ay isku dayaan in ay la xiriiraan waaxda sharciga si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan amar kasta oo garsoor, waaran kasta ama yeeris kasta oo maxkamadeed.

4.4.4 Macallin fasal ma siidayn karo arday marka uu codsado shaqaale adeeg bulsho ama sarkaal sharci fulin haddii codsigan tixgelin iyo ogolaansho uu ka helin maamulka dugsiga ee ku habboon.

4.4.5 Sharci fulinta ayaa arday dugsiga ka xiri kara iyagoo haysta waaran maxkamadeed oo ansax ah ama waaran la'aan haddii uu si kale u oggol yahay sharcigu. Xubnaha shaqaalaha dugsiga waa in aysan faragelin go'aanka sharci fulinta si arday dugsiga looga saaro ujeedooyin fulinta sharciga ah; si kastaba ha ahaatee, waa in la sameeyaa dadaalo macquul ah oo lagula tashanayo waaxda sharciga ee degmada kahor xiritaanka xiritaankana la ogaysiiyaa waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga sida ugu dhakhsiyaha badan.

4.4.6 Arday aan lagu xirin xabsi looma siideyn karo saraakiisha sharci fulinta iyadoon oggolaansho hore laga haysan waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga, ama haddii waalid ama qof mas'uul ka ah aan la heli karin, maamulaha ayaa oggolaan kara siideynta haddii uu u arko in ay lagama maarmaan u tahay badqabka ardayga.

4.4.7 Saraakiisha fulinta sharciga ma ku lug lahaan doonaan go'aanka waxbarashada ee ardayga looga saarayo iskuulka iyadoo ciqaabta edbin ahaan loo hayo.

References:

- Minnesota Statute 13.32, Educational Data
- Minnesota Statute 121A.72, School Locker Policy
- Minnesota Chapter 260E, Reporting of maltreatment of minors
- U. S. Constitution, Amendment IV
- Minnesota Constitution, Article 1, § 10
- *New Jersey v. T.L.O.,* 469 U.S. 325, 105 S. Ct. 733, 83 L.Ed.2d720 (1985)
- MSBA/MASA Model Policy 502, Search of Student Lockers, Desks, Personal Possessions, and Student's Person
- MSBA/MASA Model Policy 519, Interviews Of Students By Outside Agencies